

Warbixin loogu
talagalay dadka
dalka Iswiidan
ku cusub ama
dhowaan yimi

somaliska

Hanuuninta Dadweynaha

Ma ku cusub tahay/dhowaan miyaa dalka Iswiidan timi? Xaaladaas waxaad xaq ku leedahay dhigashada koorso xiriir la leh hanuuninta dadweynaha, waa koorso ku saabsan bulshada dalka Iswiidan oo lacag la'aan ah. Waxaad ka heli doontaa aqoonta xuquuqda aad dalka ku leedahay iyo waajibaadkaaga. Sidoo kale waxaad ka heli doontaa aqoon ku saabsan dimuqraatiyada dalka Iswiidan iyo qaabka hab-dhiska bulshada dalka. Waa koorso laga helo warbixin muhim a – taasoo qofka u suuraggelin doonto helida gogoldhigashada wanaagsan ee dalka Iswiidan!

Hanuuninta dadweynaha waxaa lagu hela luqadda hooyada, iyo luqado kale oo adiga aad u garanayso. Koorsada waxay kaalin ka geysata in qofku u sida ugu dhaqsi badan u dhexgalo suuqa shaqada iyo u bulshada dalka ka qayb galo. Waxaad haysataa fursad aad ku dhegaysato, ku weydiiso ama ku dooddo.

Tusmada koorsada

Koorsooyinka Hanuuninta dadweynaha ee Gobolka Stockholm waxay u qaybsan yihiin afar qaybood:

- Ku soo-dhowoow dalka Iswiidan
 - Shaqo iyo waxbarasho
 - Dimuqraatiyada iyo ka qaybgelida
 - Ku noolashada dalka Iswiidan
-

Yaa koorsada dhigan karo?

Koorsada Hanuuninta dadweynaha waxaa dhigan karo dadwaynaha da` dooda u dhaxayso 18–64 sano, ku cusub dalka Iswiidan oona ka qaybgalo barnaamijka sal-dhigida [etableringsprogrammet på arbetsförmedlingen] ee uu Xafiiska Shaqada qabanqaabiyo ama dalka u yimi qaraabo/ehel ahaan, kana diiwan gashanaa degmooyinka dalka Iswiidan muddo aan saddex sano ka badnayn.





Fursadda dhigashada koorsada Hanuuninta dadweynaha lama siiyo qofka:

- jinsiyad ka haysto Midowga Yurub/Isbahaysiga dhaqaalaha Yurub ama dalka Switzerland
- dugsi sare dhigto
- shaqo darteeda dalka u yimi
- waxbarasho ama cilmibaaris dartooda dalka marti ugu ah

Isku qorida iyo su`aalaha

Isku qorida koorsada darteed waxaa email loo soo dira sam@edu.stockholm.se.

Su`aalaha guud dartood waxaa email loo soo dira infosam@edu.stockholm.se ama la waca 08-508 35 443.

Xarunta Hanuuninta dadweynaha Gobolka Stockholm (Centrum för samhällsorientering i Stockholms län) waa xafiiska Hanuuninta dadweynaha ay wadajir ahaan u leeyihiin dhammaan degmooyinka gobolka. Warbixin dheeraad awgeed waxaad booqan kartaa barta internetka ku qoran luqado badan www.nyistockholm.se.

Xarunta Hanuuninta dadweynaha Gobolka Stockholm
Centrum för samhällorientering i Stockholms län
Telefon 08-508 35 443 | **Epost** sam@stockholm.se
Goobta barta internetka www.nyistockholm.se



**CENTRUM FÖR
SAMHÄLLSORIENTERING**
I STOCKHOLMS LÄN